THE STATE EDUCATION DEPARTMENT /
THE UNIVERSITY OF THE STATE OF NEW YORK / ALBANY, NY 12234

Lissette Colon-Collins, Assistant Commissioner | Office of Bilingual Education and World Languages

55 Hanson Place, Room 594
Brooklyn, New York 11217
Tel: 718-722-2445 Fax: 718-722-2459

89 Washington Avenue, Room 528EB
Albany, New York 12234
Tel: 518-474-8775 Fax: 518-474-7948

XUQUUQDA BIILKA WAALIDIINTA EE BARTAYAASHA LUUQADA INGIRIISKA EE GOBOLKA NEW YORK

Waaxda Waxbarashada ee Gobolka New York (NYSED) Guddoomiyaha Sharciyada Qeybta 154 waxay ku siisaa adiga – waalidiinta/masuulada ee Bartayaasha Luuqada Ingiriiska (ELL) - iyo:

1. Xaquuqda carruurtaada inay helaan waxbarashada dadweynaha oo lacag la'aan ah ee dugsiga degmada ee meesha aad ku nooshahay, iyadoo aan laga eegin xaaladaada socdaalka ama carruurta (tusaale ahaan, haddii xubnaha qoyskaaga ay yihiin muwaadiniin, muhaajiriin, ama bilaa-sharci yihiin) iyo luuqada aad adiga ama carruurtaada ku hadashaan.

2. Xaquuqda aad leedahay aad carruurtaada uga diiwaangelisid dugsiga iyada oo aan lagu weydiin in aad dhiibtid macluumaad ama waraaqaha muujin karo xaaladdaada socdaalka ama carruurtaada. Ma lagu weydiin karo inaad keentid kaarka Amniga Bulshada ama Lambarka, fiisada socdaalka ama xaalada fiisaha, ama waraaqaha dhalashada ama xaalada dhalashada.

3. Xaqa sida waafaqsan sharciga federaalka in aad heshid turjumaan/fasire uqalma luuqada aad dooratay ee isdhexgalyada muhiimka ah iyo dugsiga degmada .

4. Xaquuqda carruurtaada ay ku helayaan barnaamijka Waxbarashada Labada-luuqad (BE) marka ay jiraan heerka fasalka ardayga 20 ama ka weyn yihiin ardayda heerka fasalka oo ku hadlaan isku midka luuqada quriga/ koowaad. [1]

5. Xaquuqda ogeysiinta ku qoran oo af Ingiriis ah iyo luuqadaada aad doorbiday oo carruurtaada loo aqoonsaday sida ELLs oo waxaa lagu meeleynayaa Waxbarashada Labada-luuqad ama Ingiriiska sida barnaamijka Luuqada Cusub (oo horay loo yaqiinay Ingiriiska sida Luuqada Labaad). [2]

6. Xaquuqda fadhiga wacyigelinta tayada sare leh, oo ay bixiyaan dugsiga degmadaada, tasoo diiradda saarta heerarka gobolka, imtixaanada, iyo filashooyinka dugsiga ee ELLs, iyo sidoo kale sida hadafyada barnaamijka iyo shuruudaha Waxbarashada Labada-luuqad iyo Luuqad Cusub. Wacyigelintaan waa in ay dhacdaa ka hor meeleynta ugu dambeeyo ee barnaamijka dugsiga, oo waa in ay ahaadaan luuqada aad doorbiday.

7. Xaquuqda in aad hesho macluumaad oo ku saabsan hormarka luuqada Ingiriiska carruurtaada, iyo sidoo kale hormarka luuqada hooyo haddii ay ku jiraan barnaamijka Waxbarashada Labada-luuqad.

8. Xaquuqda aad kula kulantid shaqaalaha dugsiga ugu yaraan hal mar sannadkii, marka lagu daro kulamada kale ee guud ahaan looga baahan yahay, inay guud ahaan ka wada hadlaan hormarka waxbarashada iyo horumarka luuqada carruurtaada.

9. Xaquuqda in caruurtaada lagu meeleeyo Waxbarashada Labada-luuqad ama Ingiriiska sida barnaamijka Luuqada Cusub 10 maalmood ee diiwaangelinta kadib, iyo xaqa aa u leedahay inaad ka baxdo barnaamijka Waxbarashada Labada-luuqad. Ugu yaraan, carruurtaada waa inay helaan waxbarashada luuqada Cusub.

10. Xaquuqda in ay carruurtaada u bedeshaan dugsi kale ee degmadaada oo bixiya Waxbarashada Labada-luuqad ee luuqadaada, haddii dugsiga hore ee carruurtaada uusan bixin barnaamij noocaas ah.

11. Xaquuqda carruurtaada inay u helaan si simman dhammaan barnaamijyada iyo adeegyada uu dugsiga degmada bixiyo, oo ku habboon da'da iyo heerka fasalka oo ay ku jiraan kuwa looga baahan yahay qalin-jebinta, iyo dhammaan barnaamijyada dugsiga ee loo heli karo ardayda kale.

12. Xaquuqda carruurtaada ay ku helayaan dhammaan tusmooyinka waxbarashada muhiimka ah ah oo dhan, iyo in u ay bartaan Ingiriiska iyo maadooyinka kale sida Akhrinta/Luuqada Fanka, Xisaabta, Sayniska, iyo Cilmiga Bulshada ee isku heer waxbarashada sida carruurta kale. Xaq u lahaanshaha adeegyada ELL ma xadeyso awoodda lagu helo tusmada waxbarshada asaasiga ah.

13. Xaquuqda carruurtaada in ay si buuxda u helaan hawlaha ka baxsan manhajka (kooxyada dugsiga kadib, ciyaaraha, iwm). Xaq u lahaanshaha adeegyada ELL ma xadeyso awoodda looga qeybqaadanayo hawlaha ka baxasan manhajka.

14. Xaquuqda carruurtaada oo ay ku helaan adeegyada taageerada (tusaale ahaan, Adeegyada Waxqabadka Waxabarasha) oo la waafajiyay qorshooyinka waxqabadka walba ee dugsiga/degmadu siiso ardayda oo dhan.

15. Xaquuqda carruurtaada lagu baarayo sannad walba si loo go'aansado hormarkooda luuqada Ingiriiska, iyo si loo helo warbixinta ku saabsan waxqabadka carruurtaada ee imtixaamada waxbarashada, oo ay ku jiraan imtixaamada Cusub ee gobolka New York.

16. Xaquuqda carruurtaada si joogta ah looga diiwaangelinayo ee sanadka ku sannad ee Waxbarashada Labada-luuqad ama Ingiriiska oo sida barnaamijka Luuqada Cusub iyaga oo ku harayo ELLs.

17. Xaquuqda lagula xiriirayo Xafiiska Waaxda Waxbarashada Gobolka New York ee Waxbarashada Labada-luuqad iyo Luuqadaha Aduunka haddii kuwa ka mid ah xuquuqaha kore lagu xadgudbay.

    Fadlan soo wac **Lambarka Waalidka ELL** ee **1-800-469-8224**, ama i-meelka: nysparenthotline@nyu.edu

    Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo: **www.p12.nysed.gov/biling**
    ama u qor:

    New York State Education Department
    Office of Bilingual Education & World Languages
    55 Hanson Place, Room 594
    Brooklyn, New York 11217

[1] IMagaalada New York, sida Ogolaanshaha Rasmiga ah ee Aspira, barnaamijka BE ayaa waxaa loogu baahan yahay fasalada K-8 haddii heerka fasalka ardayda 15 ama in ka badan ku hadlaan luuqad isku mid ah ee wadaagida labada fasal. Haddii aysan jirin tiro ku filan oo ardayda u qalanta ee dugsiga ku jirta, laakiin ay ku jiraan degmadeeda, degmadu waa in ay bixiyaan barnaamij BE.

[2] Dhamaan ELLs waxay hormariyaan xirfadahooda Ingiriiska oo dhinaca koorsooyinka "Ingiriiska sida Luuqad Cusub" . Intaa waxaa dheer, kuwa barnaamijka Waxbarashada Labada-luuqad sidoo kale waxay ku qaataan Fanka Luuqada Guriga. Aaga tusmada koorsooyinka asaasiga ah (tusaale ahaan, Xisaabta, Sayniska, Cilmiga Bulshada)) waxaa lagu bixiyaa barnaamijka Waxbarashada Labada-luuqad *labadaba* Ingiriiska iyo luuqadooda hooyo. Kuwa aan ku jirin barnaamijka Waxbarashada Labada-luuqad waxay qaataan aaga tusmada koorsooyinka asaasiga *ee af Ingiriis ah*.